



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, , Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay: <https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Diisambar 2, 2021

Ku socota: Bixiyayaasha Taageerada Hawlaha Maalintii (DSA) iyo Shaqada

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Deeq lacageed oo loogu talagalay Bixiyayaasha DSA iyo Shaqada

Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS) ayaa soo saaray codsiyada deeqda lacageed oo loogu talagalay shaqada iyo bixiyayaasha taageerada hawlaha maalintii (DSA) iyada oo sababtu tahay dhibaatooyinka dhanka shaqaalaha iyo cudurka baahsan COVID-19. Maalgelinta guud ee loogu talagalay deeqda lacageed waa \$5 milyan.

Deeqda lacageed waxaa loo isticmaali karaa sii haysashada shaqada iyo shaqaaleysiinta, kharashyada la xiriira COVID-19 iyo kharashyada hawlgalka ee uu sababta u yahay xaddidnaanta adeegu.

ODDS ayaa qaybin doona \$5 milyan oo doolar iyada oo lagu saleynayo qiyaasta adeeg bixiyaha. Qiyaasta adeeg bixiyaha ayaa lagu go'aamiyaa iyada oo la eegayo celceliska shaqada iyo dakhliga DSA. Faahfaahin dheeraad ah ayaa laga heli karaa [internet-ka](#).

Si ay dalbadaan, hay'adaha daryeelka bixiya ee qalmaa waa in ay buuxiyaan oo [saxiixaan codsiga](mailto:saxiixaan.codsiga@oddsarpa.funding@dhsosha.state.or.us) uguna gudbiyaan ODDSARPA.funding@dhsosha.state.or.us **muddo aan ka dambeyn 5 galabnimo ee Diisambar 9, 2021.** Iyada oo sababtu tahay qaabka maalgelinta, soo gudbinta lala soo daaho lama aqbli doono.

Haddii aad hayso su'aalo la xiriira deeqdan lacageed, oo ay ku jiraan, kharashyada loo qalmo ama walwal ah waqtiga loo qabtay, Qaybta Mashaariicda Gaarka ah ee ODDS kala xiriir ODDSARPA.funding@dhsosha.state.or.us.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.